# IPAD LOOGU TALAGALAY ARDAYDA SPPS: WAXAAD U BAAHANTAHAY INAAD OGAATID

BUUGA GACAN QABSIGA ARDAYDA IYO QOYSKOODA



# WAXA LAGA HELI DOONO "CONTENTS"


HORDHAC 4
- Waa maxay Shaqsi barashadu? 4
- Waa maxay sababta keentay in iPad la siiyo arday kasta? 4

AASAASKA IPADKA 5
- Sidee buu u shaqeeyaa? 5
  - Cables iyo fiilooyin 5
- iPadka qolof/keys ma la socdaa? 5
- Sidee dhowrsanaysaa muraayada? 5
- Maxaan ku sameeyaa iPadka marka aanan isticmaalayn? 6
- Sidee baan u qaadaa iPad marka hawadu xun yahay? 6

NABADGELYADA IYO ILAALINTA IPADKA 7
- iPadku ma ku ammaan baa dugsiga? 7
- IMacluumaadka (information) ku jira iPadka ma ammaan baa? 7

ISTICAMAALKA IPADKA ISKUULKA DHEXDIISA 8
- Batterigu ma buuxaa? 8
- Sidee baan iPadka ugu badbaadin (save) 8
- karaa shaqadayda? 8
- Maka daabacan karaa iPadka? 8
- Maxaa dhacaya haddii iPadka la dayactirayo? 9
- Waxaan leeyahay mid aniga ii gaar ah. Ma qasab baa inaan isticmaalo dugsiga iPadkiisa? 9

KU ISTICMAALKA IPADKA GURIGA 9

APPS KU JIRA IPADKA 9
- Apps ay leedahay Degmada 9
- Maan buuxsan (dowload) karaa apps aniga ii gaar ah? 9
- Dib u cusboneynsiinta software and operating system 10
- Waxa (content) ku jira iPadka ma aha mid gaarka loo leeyahay 10
- Si aan loogu tala galin oo loo dib-cusbaynaysiiyey operating system: iPad la jabsaday 10

SAWIRO, CONTENT AND DATA 11
- Kamarooyin iyo makarafoon 11
- Screen xiran iyo sawarida gadaale 11
- Dhawaaqa, musiga iyo ciyaaraha 11
- Ma gelin karaa iPadka music iyo ciyaaro aniga ii gaar ah? 11

YIDIDIILOOYINKA LOO ISTICMAALO IPADKA 12
- Ardayda 12
  - Isticmaal masuul ah 12
  - Aqlaaq aan loo dulqaadan doonin 12
- Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta 12
  - Liiska hubinta Waalidka ee ku saabsan appska waxbarasha 13
  - Sugnaanta la rajaynayo 13
  - Kormeerka iyo xaddida waqtiga shaashadda 13
  - Sifayn 13
    - La soco horumarka ardayga 13
    - Apps ka buuca compus ka 13

IPAD WAXYEELLO GAARTAY, LUMAY AMA LA XADAY 14
- Daryeelka Apple Care+ 14
- Qalab la Waxyeellay iyo dayactirka farsamada 14
- iPad lumay ama la xaday 14

CAWAAQIBTA IPADKA LUMAY, LA XADAY, AMA DHAAWAC ULA KAC LA GAARSIIYEY 15
- Cawaaqibta lagu mutaysta ardayga oo aanan soo celin iPad-ka iyo qalabka weheliya, ama in uu soo dhaawaco qalabkaas 15

HESHIISKA DEYMINTA IPAD-KA ARDAYDA EE ISKUULADA DADWAYNAHA SAINT PAUL 17

KHEYRAADKA KALE 19
- Siyaasadaha Degmada ee ku saabsan technology 19
- Ilahaha laga talo qaato 19

# HORODHAC

Waxaan ku faraxsanahay in aan siinayno iPad arday kasta ee dhigta Dugsiyada Dadwaynaha ee Saint Paul (SPPS). Waxaan aaminsanahay arday walba oo haysta iPad u gaar ah inay kaa caawin doona waxbarasho mida ugu fiican. Isla mar ahaantaa, ardayku ku fiicnaan doonaa xirfadaha farsamada ee hadda ah mid aan laga maarmin dhinac kasta oo nolosha ah.

Ardaygaaga iPadkiisa wuxuu u furi doonaa duni cusub ee ka caawisa waxbarashada.

Waxaa kale ay siin doontaa ardaygaaga - iyo adigaba - xilalka cusub oo muhiim ah.

In Bogagga soo socda, waxaan kuu soo bandhigaynaa ardaygaaga iPadkiisa cusub, sharxi donaa sidii aad u daryeeli lahayd, ka jawaabi donaa qaar ka mid ah su'aalaha laga yaabaa in adiga iyo ardaygaaga qabtaan, liis garaneyaa sharciyada ugu muhiimsan si ammaan ahaan iPadka loo isticmaalo.

## WAA MAXAY SHAQSI BARASHADU?

Barashada shakhsiga ah waa geedi socod lagu ogaanayo sida ugu wanaagsan ee arday walba wax ku baran karo. Ardayda qaar ayaa u baahan in ay maqlaan casharka in ka badan hal jeer. Kuwo kale waxay u baahan yihiin inay arkaan casharka. Mid ka mid ah ardayda waxaa laga yaabaa inuu diyaar u noqdo cashar sare iyadoo arday kalana oo fasalka la dhigta u baahdo in aad ku tababarato aasaaska hoose. Casharada ay la socdaan ardayga tarkiisa, dhaqankiisa, ama luuqadiisa ardayga waxay uga dhigaan ardayga waxbarashada mid micno leh.

## WAA MAXAY SABABTA KEENTAY IN IPAD LA SIIYO ARDAY KASTA?

IPad waa qalab technology oo xoog badan. Marka arday walba uu leeyahay iPad uu keligii isticmaali karo, qalabka wuxuu noqonayaa mid shaqsiyeed kulmin karana danahaaga shaqsiyeed iyo hanaankaaga waxbarasho.

iPadka waxaa la socda camera, internet wireless, eray qoraa (processor), iyo dhammaan noocyo kale duwan oo sofware ah si fududna loo isticmaalo oo loo yaqaan "apps". iPadka waxaa kale oo la socda laguna dhisay muuqaalada ka dhiga barashada mid fudud oo raaxo u leh qof kasta.

Muhiim ma aha in Internet guriga kuugu jiro. Wax kasta oo ardaygu u baahan yahay in iPadka u isticmaalo, wuxuu awoodaa inuu kusii shubto inta uu iskuulka joogo. iPadka si fudud ayaa loo qaadi karaa batarigiisuna wuxuu noolaan karaa muddo dheer, sidaa darteed waxbarashadu meel kasta ayay ka dhici kartaa.

## HELITAANKA IPADKA

iPadka waa hantida dugsiyada bulshada ee Saint Paul, ardaydu waxay isticmaali doonaan sanad dugsiyeedka iskuulka. Ardeyda iyo waalidkood ama masullkooda waa inay buuxiyaan soona gubsiyaan waraaqaha muhiimka ah intaan ardayka loo qoondeynin iPadka.

## SOO CELITAANKA IPADKA

Ardayda horey u qalin jibisa, ka baxda, ama ka noqota dugsiyada bulshada ee Saint Paul sabab kasta darted waa inay soo celiyaan dugsiga iPadkiisa, qolofkiisa, dab qaadaha, iyo fiiladiisa iyagoo ku sugan xaalad ay shaqeenayaan maalinta ay baxayaan ama ha korba.

## MACIIN BIDIN

Si oo hubiyo waxbarasho siman qibradna leh, ardayda oo dhan waxaa looga baahan yahay inay iPadka ku isticmaalaan iskuulka. Waxaan fahamsanahay in qoysaska qaar laga yaabaa in ay diidaan in technology lagu isticmaalo guriga dhexdiisa. Xaaladdan oo kale, ardaydu waa inay isu diyaarin siday u dhamaystiri lahaayeen shaqada casharada guriga iPad la'aan kasoo nagaan (joogi) doona dugsiga.

# AASAASKA IPADKA

Waxan rajaynaynaa in ardayda SPPS ay ku farxi doonaan iPadka sida aynu ugu farax sanahay. Technology Tani waa mid waxtar leh oo adag ah - marka si sax ah loo xannaaneeyo. Warar aad u badan ayaan idiin sheegi doona, kuna saabsan sida loo isticmaalo loona daryeelo iPadka. Fadlan akhri bogagga soo socda lana xiriir dugsigaaga wixii su'aalo ah ee aad qabto.

## SIDEE BUU U SHAQEEYAA?

iPadka wuxuu ku shaqeeyaa batteri gudaha ah oo la buuxin karo. Isticmaal oo keliya Apple wall charger marka aad dab-qaadanaysid. Hadaad sugto ilaa tilmaamta batteriga ka hoos marayo 20 % ama guduud/casaan isu badeleyo ka hor inta aadan dab- qaadaan, batteriga wuxuu socon doono muddo dheer.

## IPADKA QOLOF MA LA SOCDAA?

Haa. iPad kaaga waxaa la socda qolof loogu tala galay in looga ilaaliyo dhibka ooga imaanaya isticmaalka maalin walba. Fadlan ku hay iPadka qolofka degmada iskuulka soo raacisay. Ha ka saarin ama tirtirin wax stickers ah ama qoraal ah oo degmada iskuulka soo saartay kuna yaala iPadka ama qolofka. Sidoo kale, ha ku darin qoraal, sawirada, stickers , ama farshaxanka kale iPadka ama qolofkiisa korkooda.

## SIDEENDHAQAALEEYAA(SCEENKA)MURAAYADA?

BNoqo mid u jilicsan iPad kaaga gaar ahaan shaashadda. Waa inaadan:



- Ku tiirsan shaashadda
- Aadan iPadka dul-saarin buugaag ama waxyaabaha kale ee culus.
- Aadan ku garaacin iPadka derbiyada, albaabada, dadka, ama waxyaabaha kale.
- Aaadan cabitaanno dul-saarin buug ama boorso iPadka ku dhex jiro.
- Aaadan isticmaalin waxyaabaha dadka mudi si aysan shaashadda u xaganin una dhaawicin.
- Aadan qalimaan ama qalmin qori u isticmaalin shaashadda.
- Aadan qolofka galin wax aan iPadka ahayn.

Si loo ilaaliyo shaashada marka aad dhexmarayso hoolalka dugsiga, iPadka ka hormari jirkaaga iskana ilaali inaad ku dhac-dhacdid ardayda kale.

Si aad u nadiifiso shaashadda isticmaali iPadka tirtirkiisa mid jilicsan, maro nadiif ah - qalayl ah sida shukumaan saxamada qalajiya. Marna ha u isticmaalin tan daaqadhaha lagu nadiifiyo, kiimikada guryaha lagu nadiifiyo, ammonia, alcohol ama waxyaabaha alcohol - ku salaysan, Waxay meesha ka saari karaan daaha muraayada iPadka gaarka ah/ama xagtin gaarsiin kartaa shaashadda. Sidoo kale, ha isticmaalin hawo cadaadiyo si aad u nadiifiso dekedaha (yar ee furan cidhifyada iPadka halkaas oo ay fiilooyinka ku xarig xirtaan).

## CABLES IYO FIILOOYIN

- Fadlan taxaddar marka aad cable ama fiilooyin galinayso iPadka. Tani waxay ka hortagi doona in dhaawac soo gaaro.
- Cable ka ama fiilooyinka si xoog leh ha ku qasbin iPadka.
- iPadka u Isticmaal oo keliya adabtarada awoodda ee degmada ogalaatay.
- Koolo "tape" si fudud loo saari karo ku calaamadee cable ka iyo adabtarada awood leh.
- Ha ku qorin wax calaamado joogto ah leh fiilooyinka ama adabtarada awooda leh korkooda.

# AASAASKA IPADKA

## MAXAAN KU SAMEEYAA IPADKA MARKA AANAN ISTICMAALAYN?

Ardeyda ku jirta sanad dugsiyeedka PreK-5 waxay ooga tagi doonaan iPadka fasaladooda. Ardayda ku jirta sanad dugsiyeedka 6-12 waa inay iPadka markaysan isticmaaleen ku xareeyaan locker yada qufulan ee dugsiga. shayna ha dul saarin iPadka marka uu ku jiro locker qufulan, haddii locker kaaga la quful jabiyo, isla markiiba war bixin gaarsii xafiiska weyn ee iskuulka.

Ardayda loo ogolaaday inay iPadka guriga u qaataan (guud ahaan ardayda ku jirta sanad dugsiyeedka 6-12) waa inay maalin walba dugsiga ka dib iPadka u qaataan guryahooda.

Qalab kasta oo elektaroonik ah (iPad, telefoonada gacanta, iwm) waxay noqon kartaa jeedinaaya iyo carqaladeeyo wartiga hurdo haddii aad loo isticmaalo ka hor wakhtiga jiifka. Si aad u dhafrin habeenkii, la soco waqtiyada aad iPadka isticmaashid, khubaro waxay soo jeedinaya in qoysaska ay dhigtaan qalabka elektaroonigga qololka caadiga ah ee guriga ku dhex yaala. Aqoonso meel dhexe ee guriga, halkaas oo ardaydu ku kaydato kuna dab-siiso qalabka.

## SIDEE BAAN U QAADAA IPAD MARKA HAWED XUN YAHAY?

Cimilada ka ilaali iPadka. qolofka iPadka ku ilaali si heer kulka oo xad dhaaf ah marna u gaaarin. Had iyo jeer waxaa inuu ku jiraa shandad ama buug marka uu dibada yaalo. Sidoo kale:

- Ha ooga tagin iPad kaaga cimilada kulul oo ka karoysa 95 F
- Ha ooga tagin iPad kaaga cimilada qaboow ee ka hoseesa 32 F
- iPadka ka fogee biyaha iyo huurka (humidity) xad dhaafka ah



# NABADGELYADA IYO ILAALINTA IPADKA



IPad waa qalab aad u qiime badan oo noqon karta mid bartilmaameed u ah xatooyo. Si aad u hubiso in aysan taasi dhicin:

- Marna cidlo ha ooga tagin iPadka.
- Ha ooga tagin ama ha ku kaydin iPadka baabuurka.
- Ha amaahinin iPadka qof kale. Adiga keliya ayaa mas'uul ka ah daryeelka iyo ammaanka iPad kaaga.
- Ha isticmaalin iPadka ama ha u ogolaan inuu noqdo mid la arki karo marka aad sugayso joogtana baska ama saldhigga tareen; raacida gaadiidka dadweynaha, sida basaska Metro Transit ama Tareenka fudud; ama marka aad xaafada dhexdeeda lugaynayso.
- Dhex geli iPadka boorsada iskuulka marka aad u socodid ama aad ka imaanaysid iskuulka si aan loo arkin.
- PIN ama Passcode ayaa loo baahan doonaa si looga hortago qof aan loogu talagelin inuu isticmaalo iPad kaaga iyo macluumaadkaaga shakhsiyeed. Ha la wadaagin PIN kaaga cid kale.
- IPad kasta wuxuu leeyahay lambar aqoonsiga iyo tag u gaar ah oo ah gacan ku haynta degmada.
- Ha ka saarin taaga kana badelin lambarada.



## IPADKU MA KU AMMAAN BAA ISKUULKA?

Si looga hortago tuugada, marna ha uga tegin iPadka meel aan cid masuul ka ah joogin. Meelahaas waxaa ka mid ah fasallada xidhin, qolalka labiska, shaybaarka/qololka kombiyuutar, xarumaha maktabada / warbaahinta, meelaha lagu cunteeyo/qolalka qadada, musqulaha, fasalada dhexdooda "hallways", ama meel kasta ku salaysan dugsiga, oo ay ku jiraan garoonnada ciyaaraha iyo xarumaha ciyaaraha.

iPadka Ha ooga ka tegin meelaha la socdo ama dhulka, xitaa haddii ay tahay in bac ama boorsada uu ku dhex jiro. Waxaa dhici karta in lagu istaago oo waxyeelo la gaarsiiyo

Ardayda fasalada 6-12: haddii aadan u baahneyn iPadka fasalka dhexdiisa, ama haddii macallinkaagu ku sheegay in aan la keenin iPadka fasalka, ku kaydi sanduuqa xiran "locked locker". Ha ooga tegin iPadka boorsada adiga oon la joogin. Markasta oo iPadka kaa fog yahay ama guriga kuu oolin ama sanduuqa xiran "locked locker" kuugu jirin, wuxuu halis u yahay in la xado.

## MACLUUMAADKA (INFORMATION) KU JIRA IPADKA MA AMMAAN BAA?

Isku garadka digitaka, taas oo ka mid ah Apple IDs, cinwaanada e-mailka, iyo usernames iyo passwords ee nidaamka online iyo xisaabaadka, waa in loo isticmaalo ardayga oo kaliya oo waa in uu ahaado mid qarsoodi leh. Ku dar iPad kaaga PIN ama passcode si aad ooga hortagto dadka aan laagu taligelin inay isticmaalaan qalabka arkaana xogtaada, oo marna ha la wadaagin magacaaga iyo password kaaga dadka kale. Sidoo kale ha isticmaalin username ka iyo password ka qofka kale.

# ISTICAMAALKA IPADKA DUGSIGA DHEXDIISA

iPad kaaga waxaa loogu talagalay isticmaalka dugsiga, waa in la keeno dugsiga maalin walba isagoo leh batteri buuxa. Ardaydu waa inay tagaan fasal walba iyagoo iPad kooda haysta, haddii aysan jirin in macalin gaar ah uu amray inay kasoo tagaan. Ardayda ayaa ka mas'uul ah inay dhamaystiraan shaqada koorsada, xitaa haddii iPadka guriga kaga yimaadaan.

## BATTERIGU MA BUUXAA?

Ardayda iPadka guriga u qaata waa inay kula soo noqdaan dugsiga iPad kooda isagoo leh batteri buuxa. Haddii aadan batteriga buuxin, waxaa laga yaabaa inaad awoodi waysid inaad ka qayb qaato hawlaha waxbarashada fasalka.

## SIDEE BAAN IPADKA UGU BADBAADIN (SAVE) KARAA SHAQADAYDA?

iPad kaaga goobihiisa "settings", apps, photos, music, email, calendar, xiriirada, Bookmarka Safari iyo Liisaska Aqriska waxaa si toos ah maalin walba loogu badbaadiyey "saved" iCloud ka, maalin walba ilaa iyo inta iPadka batterigiisu buuxo, ku xiran yahay internetka wireless, laguna badbaadiyey xirayna Passcode.

Caddaymaha "documents" kale oo dhan, waxaanu kugula talinaynaa in aad nafsadaada u gudbisid email caddaymahaaga "documents" ah ama aad gelisid faylasha SPPS Apps / Google Drive ee keydisga. Meel keydin waad ka heli doontaa iPadka, laakiin ma aha mid la taageero. Waa masuuliyadaada adiga ku saaran inaad hubisatid shaqadaada/waraqahaaga inaysan lumin haddii iPadka jabo ama aad kas la'aan wax iska tirtirto. iPad halaysan marna ma noqdo marmarsiinyo loo aqbali karo shaqo aan lasoo gudbin.



## MAKA DAABACAN KARAA IPADKA?

Inkastoo ay suurogal tahay in laga daabaco iPadka, ardayda waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay isticmaalaan SPPS Apps/Google Drive si ay macalimiinta ula wadaagaan waraaqaha iyo faylasha mar kasta oo ay suuragal tahay. Tani waxay taageeraysaa diyaarinta ardeyga ee dhinaca jaamacadda/xirfadaha shaqooyinka iyo inay ka caawiso dugsiyada inaysa isticmaalin warqado badan.

## MAXAA DHACAYA HADDII IPADKA LA DAYACTIRAYO?

Ardaydu waxay heli doonaan kumeelgaar ama beddelaad marka iPadkii hore ee loo xilsaaray la dayactirayo. Haddii uu dib u dhaco iPadka bedelka ama ku meelgaarka ah, macallinku wuxuu u ogolaan karaa ardaygaa in shaqada casharkiisa iPad la'aan dhameystiran karo.

# ISTICAMAALKA IPADKA DUGSIGA DHEXDIISA

## WAXAAN LEEYAHAY MID "DEVICE" ANIGA II GAAR AH. MA QASAB BAA INAAN ISTICMAALO DUGSIGA IPADKIISA?

Haa. Ardayda waxaa loo baahan yahay inay isticmalaan iPadka dugsiga siiyey sababtoo ah waxaa la socda oo lagu shubi doonaa qalab waxbarasho oo u gaar ah waxbarashada fasalka.

## IPAADKA OO LOO QAATA SAFARRADA ISKUULLADA

Aradyda hadii uu macalim u idmo waxay iPadyada SPPS u qaadan karaan rixlooyinka gudaha magaallada. Ardayda waxaa laga reebay in iPad-yada u qaataan safarrada fog-fog hadii ay fasax khaas ah heystaan mooyee. Hadii ay sidaasi dhacdo, ardayda ayaa ka mas'uul ah qalabka ay wataan. iPad-ku lagama bixin karo wadanka waayo heshiiska aynu la laheen shirkadda Apple ayay sidaas ku caddahay.

# KU ISTICMAALIDA IPADKA GURIGA

Ardayda fasalada 6-12 waxay awoodaan inay iPadka guriga u qaataan iyagoo u adeegsanaya ujeeddooyin waxbarasho. Dhamaan isticmaalka qalabka ay leedahay degmada - waa in la waafajiyaa tilmaamaha Isticmaalka Technology ee ku haboon Ardayda. Tilmaamaha ayaa laga heli karaa http://it.spps.org/policies/ guidelines-for-acceptable-use.

Ardayda wireless network way ku xiran karaan iPadka degmada siisay, laakiin isticmaalka oo dhan waa inay waafaqsan tahay nidaamka degmada.

# APPS KU JIRA IPADKA

## DEGMADA APP KEEDA

Apps ka degmada ee ku jira iPadka ardayda waa in ay noqdaan kuwo si fudud loo heli karo waqti kasta. Degmada ayaa app ka saari karta iPad kaaga ka dib markii aad isticmaashid si ardayda kale u helaan fursad ah sidoo kale ay ku isticmaalaan. Haddii ay taasi dhacdo, waxaad haysataa 30 maalmood inaad nuqul "copy" cusub kala soo baxdo app ka si aad u heshid faylashaada ku furan. Arintani waa la beddeli karaa.

## DOWNLOAD MAKU SAMAYN KARAA APPS ANIGA GAAR II AH?

Dhamaan apps la rakibay waa in ay racaan tilmaamaha Isticmaalka Technology ee ku haboon Ardayda. iyo sidoo kale kuwa siyaasada ee degmada. Dugsiyada Dadwaynaha ee Saint Paul ayaa xaq u leh inay ka saarto app aan habooneyn iyo/ama apps arday leeyahay oo laga yaabo inay isticmaasho buuxisana meel/boos qiimo leh oo hawlaha waxbarasho u baahan tahay.

# APPS KU JIRA IPADKA

## KEYDKA APP-YADA EE SPPS: QABKEE AYAA LOO ISTICMAALAA?

SPPS waxay ansixiyeen boqolaal apps-yada oo ku keedsan store-keena. Apps-yada ay SPPS ansixiyeen waa kuwa:

- Ay ardayda ka helayaan faa'iidoyin waxbarasho
- Ku haboon adeegsiga iskuullada ee fasallada PreK-12
- Si fudud loo isticmaali karo
- Aanan lahayn xayeysiimo badan
- Kuwa ayida nidaamka cadaallada qowmiyadaha ee u degsan SPPS
- Aanan keydinaynin diwaanka waxabarsho ee ardayda
- Marka la furayo aanan u baahnayn macluumaadka khaaska ah ee ardayda

## APPLE ID

Ardayda iPad-ka guryaha u qaata waa in ay leeyihiinn Apple ID u iyaga u khaas ah. Apple ID-ga ayay ardayda u baahanyihiin marka ay rabaan in ay apps-yada dugsiyada SPPS ka soo rogtaan app store-ka. Ardayda ay da'dooda ka weyntahay 13 sano waa in ay sameystaan Apple ID marka iPad-ka la siiyo eyaga oo isticmaalayo email-kooda degmada/iskuulka. Laga bilaabo semistarka soo socda ee sanadkan 2015, waalidiinta waa in u sameeyaan Apple ID ardayda ay da'doodu ka hoseysa 13 sano jir. Nidaamkan ayaa laga yaabaa in uu isbedelo hadii ay degmada hesho siyaabo fudud oo ID-ga lagu sameeyo.

## DIB U CUSBONEYNSIINTA SOFTWARE KA IYO OPERATING SYSTEM

Mararka qaarkood, apps iyo operating system waxay u baahan yihiin bid-ucusbooneyn "updates" kasoo keena in iPadka iyo apps ka si sax ah iyo si ammaan ah u shaqeeyaan. Ardayda waxa laga filayaa inay raacaan tilmaamaha degmada marka ay ku rakibayaan/ xirayaan app iyo marka ay bid-ucusbooneyn "update" ku sameenayaan operating system ka.

## WAXA "CONTENT" IPADKA KU JIRA MA AHA MID GAARKA "PRIVATE" LOO LEEYAHAY

iPads ka waa hantida degmada. Xubnaha shaqaalaha SPPS waxay u fasax yihiin oo heli karaan taariikhda internetka, sawirada, iyo macluumaad kale oo ku saabsan iPadka wakhti kasta. Ardayda waxaa looga baahan yahay inuu furo iPadka waqti kaste ee shaqaalaha degmada codsadaan. Haddii aadan furin iPadka markii lagu weydiiyo, waxaad heli kartaa cawaaqib "consequences" dhaqanka iyadoo la raacayo Handbookga Anshaxa Ardayga.

## BEDDELKA LA OGOLEYN EE OPERATING SYSTEM KA: IPAD LAJABSADY

Dhamaan iPad yada SPPS ayaa meel fog laga marsiinayaa "scanner" si loo hubiyo in goobaha ammaanka aan la bedelin ama la tirtirin. Haddii ardey uu dhex galo qaybaha gudaha "internal parts" ee iPadka ama wax ka bedalo goobaha amaanka, isaga ama iyada waxaa lagu qori doonaa dhaqan cawaaqib "consequences" iyadoo la raacayo dokumentigan iyo Handbookga Anshaxa Ardayga.

# SAMWIRO, CONTENT IYO DATA


## KAMIROOYIN IYO MAKARAFOOYIN

iPad waxa uu leeyahay kaamirooyink hore iyo dib iyo makarafoon ku dhex dhisan, si ardayda u qaadi karaan sawiro una duubi karaan maqalka iyo video. Dhamaan waxa la duubo iyo sawirada lagu qaado iPadka waxay hoos yimaadaan kuna xiran yihiin siyaasadaha "policies" SPPS iyo sidoo kale sharciyada gobolka iyo federaalka. waxaad sawiri kartaa ama cod duubi kartaa ama video sameyn kartaa inta aad dugsiga joogto macalin ama maamulaha dugsiga kuu ogalaaday adigoo u adeegsanaya dhinaca waxbarasha dugsiga. Marna qof kale ha sawirin, hana ka duubin video, ama cod maqal qofkaas oon ogeyn ama ku siin ogolaansho shaqsiyeed.

- Isticmaalka qalabka elektarooniga ah iyo kaamirooyin waa ka mamnuuc qolalka labiska iyo musqulaha.
- Ha u isticmaalin kaamirada sawiro ama videos aan habooneyn ama wasaq "explicit photos" cad ah.
- Ha u isticmaalin kaamirada inaad sawiro qaas ah isaga qaadid ama aad la qaybsadid macluumaadkaaga shaqsi ah qof kale.
- Ha u isticmaalin kaamirada ama makarafoonka inaad ku ceebeyso, ku maagto, ama ku dhibto/hanjabin qof kale hab kasta.
- Ha u dirin email, ha gelin internet-ka, ama si elektaroonig ha u diri sawir, video, ama cajalado maqal ah oo ah shakhsiyaad kale iyagoon oggolaansho qoraal ah ku siin.

## SCREEN XIRAN IYO SAWARIDA GADAALE

Dhamaan waxa ku jira "content:, sawirada, iyo xoga "data"ku saabsan iPadka waa in ay ahaadaan kuwo raacaya Tilmaamaha Isticmaalka Habboon ee Technology ee Ardayda iyo siyaasadaha kale ee degmada. Haddii aad sawiro dad qaawan ama la xiriira burcad aad locked screen ama home sceen ka galisid, ama ay ku jiraan luqadda aan habboonayn ama tixraacyo qori hubeed ah, hubabka kale, khamriga, daroogada, ama khamaarka, waxaad heli doontaa tallaabo edbin ah iyada oo la raacayo Handbooga Anshaxa Ardayga.



## DHAWAAQA, MUSIGA IYO CIYAARAHA

Dhawaaqa iPadka waa in uu xiranaado/aamusnaado waqtiyada oo dhan, haddii macallinka kuu ogolaado waad ka saari kartaa aamusnaanta adigoo u adeegsanaya hawlsha fasalka. Macalinkaaga ayaa sidoo kale ku siin karo ogolaansho aad ku isticmaali kartid dhaqo-gufeys "earbuds" ama samaacado dhegaha "earphones". Haddii ay taasi dhacdo, hubi in maqalka iPadka hooseeyo si aan qofka kuu dhow u maqlin karin.

## MA GELIN KARAA IPADKA MUSIC IYO CIYAARO ANIGA II GAAR AH?

iPadka music waa loo ogol yahay, ilaa iyo inta si dharci ah liisaanka "license" ku jiro islamarkaana raacaysaa dhamaan siyaasadaha "policies" degmada. Sababta oo ah meel iPadka wax loogu kaydiyo "storage space" oo kooban, fadlan maktabadaaada music oo dhan ha ku shubin iPadka.

Waxaa laga yaabaa in ciyaaro habboon kuugu jiraan iPadka, laakiin ha ciyaarin waqtiga aad dugsiga joogto ilaa maalin kuu fasaxo inaad sidaas sameyso.

# YIDIDIILOOYINKA LOO ISTICMAALO IPADKA

iPadka wuxuu nogon kartaa galab waxbarasho oo cajiib ah. SPPS waxay ku faraxsan tahay in ay awoodaan in ay siiyaan arday kasta iPad loo isticmaalo dugsiga. mas'uuliyad ayaa la socota isticmaalka iPadka, isticmaalka qaar ka mid ah lama ogola.

## ARDEYDA - ISTICMAAL MAS'UUL AH

Ardaydu waxay isticmaali karaan khayraadka technology degmada si ay u abuuraan faylasha iyo mashaariic shaqada dugsiga la xiriira, cilmi baaris, iyo qorshaynta kuliyadeed iyo shaqada mustaqbalka. Ardayda waa inay:

- Raacaan dhamaan siyaasadaha "policies" degmada iyo fasalka, nidaamka iyo tilmaamaha marka la isticmaalayo farsamada "technology".
- Si qaas ah u haystaan username iyo password ka.
- Ula dhaqmaan dadka kale ixtiraam, isticmaalaan luuqada ku haboon marka ay elektaroonik ahaan ula dhaqmayaan dadke kale.
- Isla markiiba u sheegan macallin ama dadka waaweyn ee shaqaalaha ah haddii ay helaan war elektaroonik ah ama isgaarsiin ah taasoo ka dhigaysa in uu dhibsan, ama haddii ay si qalad ah u helaan waxyaabo aan habooneyn, sawiro, video, ama bogagga "websites" internetka.
- Ixtiraam shaqada iyo hantida aqooneed ee xuquuqda dadka kale, oo aan si ula kac ah aad nuqulka "copy" sameyn, dhaawaca gaarsiin, ama aadan tirtirin shaqo qof kale leeyahay. Ardaydu waxay si sax ah u xusi doonaan ilaha marka ay isticmaalaan macluumaad qofkale, sawirada, warbaahinta, ama shaqo kale oo mashaariicda iyo hawlaha iyaga u gaarka ah.
- Ixtiraam amaanada gaarka "privacy" ah ee dadka kale. Ardayda waa inay ku xadidaan sawirada, video iyo duubista codka dugsiga/iskuulka dhexdiisa iyagoo u isticmaalaya dhinaca waxbarasho.

## WAALIDIINTA IYO MAS'UULIYIINTA

Iyadoo la tixraacayo SPPS Isticmaal qaabbilaadda ah ee Heshiiska Technology Ardayda, waalidiinta iyo mas'uuliyiinta ayaa masuul ka ah la socodka isticmaalka ilmahaaga ee internetka iyo in ay helaan kheyraadka teknoolajiga degmada oo ay ku jiraan iPadka, degmada waxay sameysay email account, meel laagu talagalay barashada oo online ah, qalabka lakaashado, iyo khayraadka waxbarasho. Waalidka iyo mas'uuliyiinta waa in ay dejiyaan rajada "expectations" cad oo ku aaddan isticmaalka habboon ee qalabka elektarooniga ah iyo inay xaddidaan helitaanka qalabka saacadaha dugsi aan la joogin. Haddii ilmahaagu uusan la soconayn xeerarkaaga , waxaad xaq u leedahay inaad xaddido helitaanka/isticmaalka qalabka guriga dhexdiisa. Xogta hoose ayaa waxaa loogu tala galay in ay kaa caawiyaan sidii aad u dejin lahay rajada "expectations" cad iyo sidaad ku ilaalin lahayd ilmahaaga isticmaalka qalabkooda.

AQLAAQ AAN LOO DULQAADAN DOONIN

Ardayda uma isticmaali karaan kheyraadka farsamada "technology" degmada si ay:

- U helaan, abuuraan, ama u faafiyaan hadal been ah ama khaldan; ama dhibaan, waxyeelaan ama maagaan dad kale.
- U dhex galaan kheyraadka farsama "technology" degmada iyadoon loo fasaxin ama aan habooneyn.
- Isticmaal, dib u soo ceshad, kaydin, ama dirid luqad aan habboonayn, sawiro, ama waxyaalaha kale ee digitalka ku dhex jira.
- Khayaameeyn, oo ay ku jiraan helida ama bixinta su'aalaha iyo jawaabaha imtixaanka: raadiya iyo/ ama nuqul "copy" ka sameeya jawaabo ama macluumaad ku saabsan internetka ama khayraadka kale ee elektaroonigga ku yaal ama in kheyraadka teknoolaji kasta ama qalabka; nuqul "copy" ka sameeya siina gudbiya macluumaad qof kale ama shaqo iyaga u gaar ah; ama sameeyo noocyo kale oo la mid ah oo qish ah ee elektaroonigga ah.
- Xadgudub ku sameeya heshiisyada copyright ama liisan yada.
- U dhex galaan kheyraad aan habooneyn ama laga xannibmay ee cayn kasta ah iyadoo la joogo deegaanka- degmada "district property" iyo xilliga dugsiga
- Faafiya ama qora xog kasta oo shakhsi ah keentana in lagu aqoonsan karo naftiisa ama dad kale, kana caawin karta qof kale inuu helo sugnaantiisa ama lasoo xiriir karo. Waxaa ka mid ah waxyaabahaas sida e - mail address, magacaaga oo buuxa , cinwaanka guriga ama dugsiga, lambarka telefoonka, waalidka ama mas'uulka magacyadooda, ama magaca dugsiga.
- Dib u habeyn operating system, ka saarin ammaanka profile kiisa ama ay kharribaan khayraadka "technology" degmada.

# YIDIDIILOOYINKA LOO ISTICMAALO IPADKA



## WAALIDIINTA IYO MAS'UULIYIINTA

SUGNAANTA LA RAJAYNAYO

S i cad oo qeexan u dhig una gaarsii ilmahaaga isticmaalka iPadka. Heshiiska Dareenka Caadiga ee Warbaahinta Qoyska "The Common Sense Media Family Agreement" wuxuu bixiyaa liiska warbixin da'dana ku haboon loona isticmaali karo in lagu hogaamiyo sheekaysiga ilmahaaga ee ku saabsan isticmaalka mas'uul ka ah ee warbaahinta iyo farsamada. Waxaa laga heli karaa http://goo.gl/Q9Ysbu.

KORMEERKA IYO XADDIDA WAQTIGA SHAASHADDA (MURAAYADA)

IPad waa qalab weyn oo wax barto, awoodna u leh in loo isticmaalo waqti-lumis. dadka waaweyn oo Kormeera iyo qaabka loo isticmaalo oo cad ayaa muhiim ah.

- Ilmahaagu ha ku isticmaaleen qalabka guriga meeshiisa dhexe, sida qolka jikada ama kuwa fadhiga, si aad si fudud ula socon kartid iyo maarayn kartid isticmaalkooda.
- Samee rajayn "expectations" in ilmahaagu marka hore dhamaystiraan casharadooda iyo hawlahooda ka hor inta aysan qalabka u isticmaalin internet-ka, ciyaaraha, ama dhegaysiga music ka.

HELITAANKA SIFAYNTA

Marka qalab uu yahay dugsiga kuna jiro network ka degmada, internet kiisa waa la sifeeyey, waxyaalaha aan habboonayn waa laga xannibay. Si kastaba ha ahaatee , marka qalabka loo isticmaalo guriga ama network ka WiFi ee dadweynaha, ardayda waxay leeyihiin in ay helaan internet-ann xaddidneyn, oo ay ku jiraan waxyaalaha aan habboonayn. Waalidiinta wireless gurigooda ku jira, way sifayn karaan iyagoo isticmaalaya qalab shaandheeya gaarna u ah. Qaar ka mid ah software, sida OpenDNS Home iyo OpenDNS Family Shield "IlaalintaQoyska", waa lacag la'aan kuwa kale sida SafeEyes iyo NetNanny waxay u baahan karaan in la iibsado. Sidoo kale in badan oo ka tirsan bixiyayaasha telefoonka gacanta iyo cable badan ayaa laga helaa qalabka sifaynta. Si fudud baad u raadin kartaa, Google magaca kuwa internet kaagabixiyaha iyo shuruudaha Waalidiinta oo xakameeya "Parental Control," barasho dheeraad ah tag si "Xfinity Parent Control."

Guriga DNS oo Furan: Sifayn xal ah oo lacag la'aan ah oo leh xakameynta waalidnimo "Parental Control" oo dabacsan gaarna loo sameeyay. Sifeey xiran Internetka ee qalab kasta oo ku xiran network ka gurigaaga, oo ay ku jiraan iPad, kombiyuutarada, iyo qalabka ciyaaraha. Faahfaahin dheeraad ah kala soco bit.ly/open-dns-home

Gaashaanka Guriga DNS oo Furan: Xal shaandha "pre-configured" oo lacag la'aan ah ee guriga sifaynaya kana hor istaagaya helitaanka wasaqda "adult content" dadka waaweyn. Faahfaahin dheeraad ah kala soco bit.ly/dns-shield

LA SOCO HORUMARKA ARDAYGA

SPPS waxay ku boorinayaan waalidka iyo mas'uulka inay isticmaalaan iPadka si ay ula socdaan horumarka waxbarasho ee ilmahooda iyo ulana xiriiraan si elektaroonig ah macallinta ilmahooda. Waydii ardaygaaga inay kuu muujiyaan wixii ay soo barteen iyo waxay ku abuureen "created" iPadka, kalana hadal sida ay u isticmaalaan qalabka dugsiga dhecdiisa.

<u>Campuska nicmada badan ee Mobile App ka eh</u>

Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta waxay isticmaali kartaa mobile app tirada badan ee Campuska kuna dhex jira iPadka si aad u fiiriyaan gareedka "grades" ilamahooda, imaanshaha, iyo shaqooyinka soo socda. Wakhtigan, gareed buuga "gradebook" Campuska waxaa isticmaala macalimiinta dugsiga sare (fasalada 6-12) oo keliya, sidaa dardeed gareed "grade' caruurta dhigata dugsiga hoose waxaa laga yaabaa inuusan u banaanayn waalidka.

<u>Isgaarsiinta emailka</u>

Waalidku sidoo kale wuxuu isticmaali kartaa Safari browser app iyaga oo furanaya email shakhsi ah si ay email ooga soo diraan macallinka ilmahooda. Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta waa in aysan Mail app ku jira iPadka ku xirin/darin email kooda shaqsiga ah sababtoo ah waxaa laga yaabaa in emailada shaqsi ah ay arkaan qof kasta oo helaa gacanta ku dhiga iPadka.

# IPAD IYO QALABKA LA HALMAALO OO AY WAXYEELLO GAARTAY, LUMAY AMA LA XADAY

## DARYEELKA APPLECARE+

Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan isticmaalka iPad kaaga iyo iCloud ka, xidhiidhinaya shabakadaha wireless, ama ku saabsan isticmaalaya barnaamijyadooda Apple - ku tilmaamay sida Keynote, Numbers, ama Pages, la xiriir lambarka telefoonka AppleCare ee ku yaal kaarka magaca ee ku dhegan iPad kaaga gadaashiisa. Taageero AppleCare waxaa la heli karaa Isniin – Jimce 6 a.m. - 8 p.m. iyo 8 a.m. - 8 p.m. on Sabti/Axad.

## QALAB LA WAXYEELLAY IYO CILAD DHANKA FARSAMADA

Ha isku dayin in aad dhex gashid qalabka korontada ee gudaha ama dayactir ku sameysid iPadka. Haddii iPadka shaqeyn waayo ama waxyeelo soo gaadho, la xiriir shaqaalaha macallinkaaga ama shaqaalaha dugsiga si loogu sheegto dhibaatada Desk Service sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogal ah. fursadaha dayactir / bedelka iPadka waxaa go'aamin doona shaqaalaha jooga Service Desk. Haddii iPadka muujiyo dhibaatooyin farsamo saacadaha ka baxsan dugsiga, waxaad u baahan doontaa inaad sugtid ilaa aad kusoo noqonaysid dugsiga si ay u sheegtid.



## IPAD IYO QALABKA LA HALMAALO OO LUMAY AMA LA XADAY

Haddii iPadka uu lumo ama la xado, u sheeg xafiiska weyn ee iskuulka sida ugu dhaqsaha badan. Shaqaalaha dugsiga ayaa kaa caawin doonaa sidee waxbixin loogu gudbin lahaa Desk Service.

Ardayda hore u qalin jabisa, ka baxa, laga eryo, ama laga joojiyo diiwaangelinta ee Dugsiyada Dadwaynaha ee Saint Paul sabab kasta waa in uu iPadka ku soo celiyo degmada isagoo wata, qoloftiisa, adabtarada awood, iyo xarig yadiisa iyagoo ku sugan xaalad shaqeeys xafiiska ugu weyn ee ay dugsiga ama ka hor taariikhda bixitaankooda. Ka gaabinta in ay soo celiyaan hantida degmada ama bixiyaan intii lumtay, la xaday, ama waxyeelo qalabka gaartay, waxay keeni kartaa kartaa in talaabo sharci ah la qaado halkii 506.02 Magdhawga School Property ee lumay ama hallaabay.

Hadii uu ardaygu lumiyo galka iPad-ka ama fiilada dabka, ardayga iyo qoyskiisa ayaa ka mas'uul ah in ay soo gadaan mid qalabkii oo kale ah oo ah nooca Apple ay iibiyaan. Hadii kale waa in ay qiimaha lacagta ee uu qalabku u dhigmo.

# CAWAAQIBTA KA DHALAN KARTA FALAL AANAN HABOONAYN OO LAGU FULIYO IPAD-KA

Buuga gacan-qabsiga ee SPPS ee ay ku qoran yihiin xuquuqaha iyo mas'uuliydaha saaran ardayda ayaa qayaxaya talaabada laga qaadaya ardayda sameeya falal aanan haboonayn. Qaanuunkaasi ayaa sidoo kale loo cuskanayaa hadii uu ardayga iPad-ka u adeegsado in uu ku gaysto fal dambiyeed.

Ardayda dhamaan waxay fursad u helayaan in ay iPad-ka isticmaalaan saacadaha iskuulka eyaga oo taageera ka helaya waaxda personalised learning. Ardayda qaar ayaa waxaa loo ogolanaayaa in ay iPad-ka guryahooda u qaataan. Tani waxay ku xiran tahay da'da ardayga iyo baahidiisa waxbarasho. Ardaygii iPad-ka u adeegsado siyaaba ka horimanaya qaanuunka SPPS, waxaa laga qaadayaa talaabooyin lagaga xadidaya iPad-ka. Waxaa sidoo kale laga yaabaa in uu la kulmo ciqaabo kale oo ku aadan fal-dambiyeedka uu gaystay oo ay ka mid yihiin in lagu amro in uu qaato casharro ku saabsan isticmaalka iPad-ka.

Sida ku cad buuga xuquuqaha iyo mas'uuliyadaha ardayda, in uu ardayga qaabab aysan degmada ogolayn u adeegsado adeegyada tiknoolajiyada sida email-ada iyo internet-ka, ayuu ardayga ku mutaysanayaa ciqaabo ay ka mid yihiin in iPad-ka laga xayiro ama lagaba qaado iyo in loo diido in uu guriga u qaato, ciqaabaha lagu xusay qawaaniinta degmada ama ciqaabta ku haabon dambiga uu geystay.

Xadgudubyada Heerka 1-aad
Eedeymaha la xiriiro xadgubyada heerka 1-aad waxaa xalinaya shaqaalaha iskuulka hadii uu ardayga horey u gaysan xadgudubya waaweyn. Shaqaalaha waxay ardayga u sheegayaan qaabka haboon ee loo isticmaalo iPad-ka si uu ardyga u noqdo mid muujiyo dhaqan waangsan, aamin ah oo ay xushmad ku jirto.

Xadgubyada heerka 1-aad waxaa ka mid ah:

- In aad iPadka iyo apps-yada u adeegsatid waxyaaba aanan waxbarashada ku saabsanayn
- iPad-ka oo aadan ka taxadarin
- Kamerada iPad-ka oo aad ku qaadid sawirro qof kale asaga oo aanan ku idmin
- In aad dokumenti dad kale aad soo rogotid adigaa oo aanan laguu idmin
- Qish ama si xun u adeegsiga shaqada dad kale oo aad internetka kala soo baxdid

Xadgudubyada Heerka 2-aad
Xadgubyada heerka 2-aad waxaa loo xil saaray shaqaalaha maamulka ee iskuulka. Talaabooyinka lagu qaadayo xadgubyada noocan waxaa looga dan leeyahay in ardayga la dareensiiyo baaxadda falka uu gaystay isla markaasna lagu saxo khaladaadkii uu sameeyay. Waxay shaqaalaha ka shaqaynayaan sidii uu ardayga gaysta xadgudubyada uu sii wadan lahaa iskuulkiisa. Ogow: Hadii uu ardayga gaysto fal aad u culus ama ay xadgudubyadiisa soo noq-noqdaan, wuxuu mutaysan karaa in markaasi lagu qaado ciqaabyada xadgubuyada heerka sare.

Xadgubyada heerka 2-aad waxaa ka mid ah:

- In uu ardayga marar badan gaysto falal soo noqnoqda
- In uu daabaco ama diro qorallo ama fariimo aanan haboonayn oo dad kale wax u dhimi kara
- In uu si sharci daro ah ku bedelo qaabka uu iPad-ku u shaqeeyo (operating system)

# CAWAAQIBTA KA DHALAN KARTA FALAL AANAN HABOONAYN OO LAGU FULIYO IPAD-KA

Xadgudubyada Heerka 3-aad
Xadgudubyada heerka 3-aad waxaa laga yaabaa in uu ardaygu ku mutaysto in galin ama maalin idil iskuulka laga diro. Ogow:  Hadii uu ardayga gaysto fal aad u culus ama ay xadgudubyadiisa soo noq-noqdaan, wuxuu mutaysan karaa in markaasi lagu qaado ciqaabta xadgubuyada heerka sare.

Xadgubyada heerka 3-aad waxaa ka mid ah:
- In si qasid ah loo dhawaco iPad-ka
- In marar badan iPad-ka loo adeegsado xoogsheegasho, qish ama
- Falal kale oo ka hor-imanaya nidaamka degmada ee ku saabsan adeegsiga tiknoolajiyada

Xadgudubyada Heerka 4-aad
Xadgudubyada heerka 4-aad wuxuu ardayga ku mutaystaa in si ku meel gaar ah iskuulka looga ceyriyo.Waxaa sidoo kale laga yaabaa in booliiska lagu wargaliyo falka xadgudubka. Ganaaxa uu ardayga mutaysanayo waa in ardayga iskuulka laga ceyriyaa maalin wax ka badan. Ogow:  Hadii uu ardayga gaysto fal aad u culus ama ay xadgudubyadiisa soo noq-noqdaan, wuxuu mutaysan karaa in markaasi lagu qaado ciqaabyada xadgubuyada heerka sare.

Xadgudubyada  heerka 4-aad waxaa ka mid ah in uu ardayga raadiyo ama galo macluumaad aana haboonayn ama in uu dhaawac u gaysto qalabka tiknoolajiyada iyo diwaannada degmada.

## CAWAAQIBTA IPADKA LUMAY, LA XADAY, AMA DHAAWAC ULA KAC LA GAARSIIYEY

Hadii uu ardayga lumiyo, laga xado ama si ula kac ah u dhaawaco iPad-ka, ciqaabta uu mutaysanayo waxaa ka mid ah in loo diido in uu iPad-ka guriga u qaato iyo in uu qaato casharro dheeraad ah oo ku saabsan habsami u adeegsiga iPad-ka .Sababaha uu ardayga ciqaabahaas ku mutaysan karo waxaa ka mid shaashad ku jabaytay si ula kac ahna loo tuuray ama daadinta iPad-ka; lulid bac ama boorso uu iPad-ku ku dhex jiro; ula kac qalabka loogu daadiyo dareere “liquid; ama In shay kale lagu garaaco qalabka; waxyeelada soo gaadho qalabka oonan ku jirin galkiisii; ama samaynta beddelka aan la ogalayn ee operating system ka, oo loo yaqaan jabsiga qalabka. Waxa kale oo ka mid ah khasaaraha ama waxyeelada gaara cable danabka - ee - USB, adabtarada awood 12W, iyo qolofkooda.

## CAWAAQIBTA LAGU MUTAYSTA ARDAYGA OO AANAN SOO CELIN IPAD-KA IYO QALABKA WEHELIYA, AMA IN UU SOO DHAAWACO QALABKAAS

Haddii ardaygu ku guuldaraysto inuu soo celiyo iPadka dhamaadka sanad dugsiyeedka, ama xiliga uu iskuulka ka wareegayo, qoyska ardayga laga waxaa yaabaa in lagu qabsado qiimaha buuxa ee badalka iPadka sida waafaqsan Habka 506.02 “Compensation for Lost and Damaged District Property” - Magdhawga hantida degmada ee la lumiyay ama la wax yeeleeyay. Marka aad soo celinyso iPadka waa in aad la soo celisaa adabtarada degmada - siiyaa awood iyo filloyinka danabka - ee - USB. Ardayga oo soo celin waaya iPad-ka, galkiisa, fiilada korontada ama hadii uu soo dhaawaco wuxuu ku mutaysanayaa ganaax lacageed. Fadlan booqo barta internetka ah ee xafiiska Personalized Learning si aad u aragtid qiimaha ganaxa.

# HESHIISKA DEYMINTA IPAD-KA ARDAYDA EE ISKUULADA DADWAYNAHA SAINT PAUL

Iskuulada Dadwaynaha Ee Saint Paul waxay ardayda siiyaan fursad u sahalaysa in ay tiknoolajiyada casriga ah (technology) u adeegsadaan waxbarshada. Ardayda waxaa laga rabaa in ay raacaan oy ilaaliyaan qawaaniinta iyo xeerarka maamulka, kuwaas oy kamid yihiin isticmaalka iyo amniga tiknoolajiyada (520), xeerarka ku aadan qaabka ugu haboon ee ay ardayda u adeegsan karaan tiknoolajiyada, mamnuucida xoog-shegashada (bullying prohibition-505), reebida dhibka (Hazing prohibition-501), hab-dhaqanka ardayda (506), iyo buuga gacanta ee xuquuqada ardayda, Buuga Gacan-qabsiga ee Ardayda U sharaxaya Adeegsiga iPad-ka, si ay u sii haystaan fursadan (isticmaalka iPad-ka). Ardayga oo aan raacin shuruudahaas iyo qawaaniintaas kor ku xusan iyo kuwa ku qoran buuga gacan-qabsiga ee xuquuqda iyo mas'uuliyadaha ardayda ayaa keeni kara in ardayga uu ku gafo mudnaanta uu u leeyahay in uu iPad-ka guriga la aado.

## Ku Saabsan Dhamaan Ardayda Dhigata Fasallada PreK-12-aad.

NOQO QOF MA'SUUL AH (BE RESPONSIBLE)

- Mar walba iPad-kayga waxaan ku haysan galka uu iskuulku isiiyay, mana u dhexeysiinayo iPad-ka iyo galka shay laga yaabo in uu dhaawici karo.
- iPad-kayga waan ka taxdarayaa, markaan wax isdul saarayana waan u koraysiin.
- Galka iPad-kayga waxba kuma qorayo, waxna ma ku dhajinayo, wixii dhaawicina waan ka ilaalin. Warqada claamadda ay degmada ku dajisay iPad-ka halkeeda ayaan u dhaafayaa oo ma goynayo.
- iPad-kayga waan ka fogaynayaa wax cuntada, cubitaanka iyo wixii kale ee qoyaan ah.Waxaan iPad-kayga ku nadiifin maro qalalan, oo jilicsan, oo nadiifaha.
- Magaca aan iPad-ka ku isticmaalayo wuxuu noqonayaa magacayga.

NOQO QOF AMAAN AH (BE SAFE)

- Mar walba waan ilaalin iPad-kayga, markii aanan iskuulka ku isticmaalaynin waxaan dhigan meeshii fasalka loogu talo galy ama waxaan ku xiri sanduuqayga (locker)
- Si aan u ilaaliyo macluumaadkayga, dadka kalana isaga ilaaliyo iPad-kayga waxaan u samayna lambar sirah (Passcode).

NOQO QOF WAX SOO-SAAR LEH (BE PRODUCTIVE)

- Mar walbo waan xaqiijiin in uu baytarigu iPad-kayga leeyahay dab (charge) ku filan.
- Waxaan isticmaali oo kaliya baraha interneedka iyo apps-yada uu macalinkaygu ii sheego in aan isticmaalo.
- Waxaan u isticmaali iPad-kayga in aan shaqadayda iskuulka ku qabto waana iska ilaalin in aan wax ku min-guuriyo, ama ku qishto oo waan sheegi meeshii aan ka xigtay macluumaadkayga.

NOQO QOF IXTIRAAM LEH (BE RESPECTFUL)

- iPad-ka uma adeegsanayo in aan qof ku dacaayadeeyo, dhibo, xumeeyo, been ama warbixin qaldana ka sheego.
- Waxaan kameerada (camera) iyo mikrofoonkuba u isticmaali in aan ku qaado masawiro, codod, iyo maqalo ku haboonay kaliya.
- Kaameerada ma ku isticmaalayo musqusha dhexdeeda ama goobaha sanduuqa (locker).
- Waxaan u isticmaali iPad-kayga in aan ku diro, ku qoro, ku daaboco, ama ku soo bandhigo macluumaad ama waxyaabo kale oo sharci ha, run ah, aan handadaad ahayn, oon ahayn aflagaado lagu midab takoorayo dad kale, sidoo kale aan qofna sumcadiisa iyo sharaftiisa wax u dhimaynin.

SAMPLE
SAMPLE

# HESHIISKA DEYMINTA IPAD-KA ARDAYDA EE ISKUULADA DADWAYNAHA SAINT PAUL

Shuruuda dheeraad ah oo looga baahan yahay ardayda iPad-ka guryahooda la aada iyo kuwa leh Apple ID oo eyaga u gaar ah.

NOQO QOF MA'SUUL AH (BE RESPONSIBLE)

- iPad-kayga waxaan dhigayaa meel hawadeedu u dhaxayso 32 ilaa 95F, tusaale, waan qadan marwalba, mana kagatagayo gaariga dhexdiisa markay kulushayhay iyo markay qabowdahayba.
- iPad-kayga waxaan ku isticmaalayaa barmaamijyada iyo apps-yada ay ansixiyeen Dugsiyada Dadwynaha Ee Saint Paul.

NOQO QOF AMAAN AH (BE SAFE)

- iPad-kayga waxaan ku haysan boorsada iskuulka, ama boorsadayda markaan iskuulka u siisocodo iyo markaan ka imanayo.
- iPad-kayga wuxuu iigu jirayaa boorsadayda garabka ee iskuulka marka aan joogo meelaha laga raaco baska ama train-ka. Sidoo kale ma ku isticmaalayo baska Metro Transit ama tareenka dhexdiisa.

NOQO QOF WAX SOO-SAAR LEH (BE PRODUCTIVE)

- Mar walba iPad-kayga waxaan ku talagali in uu lahaado mug (memory) ku filan si aan u soo rogto, ugu samaysto, ama ugu duubto barnaamijyada waxbrashada la xiriira ee macalinkaygu iga rabo.
- Waan fahamsanahay in aan ay surta gal tahay in aan masaxo ama aan ka tirtiro iPad-kayga macluumaadka aniga gaarka ii ah sida masawirda hadii aan arko in mugiisu yaraanayo.

Magaca Ardayga: ______________________________ ID-ga Ardayga: ____________

Saxiixa Ardayga: ______________________________ Taariikhda: ______________

## Apps-yada, Adeegyada ku dhisan baraha-interneedka, iyo ogolaanshaha waalidka.

Si iskuulada Dadwaynaha ee Saint Paul ugu fududeeyaan 1:1 bay'o la saan qaadi karta waxbarasho ku salaysan baahida qofka, maamulku waxuu adeegsandoonaa barnaamjiyo lagu kaydiyo iPad-ka (applications-apps) iyo bara-interneed oo ku dhisan adeegyo, kuwaas oy ka shaqaynayso qolo sedxaad oo ardayda u sahalaya xiriirka khadka interneedka iyo qalabka wadashaqaynta , iyo qalab iyo waxyaabo kale oo waxbarasho. Maamulku wuxuu ku khasbanyahay in uu raaco sharciyada dowlada dhexe oo khasbaysa in la helo ogolaanshaha waalidka caruurta 13 sano kayar. Liiska apps-yada waxaa laga heli karaa barta internet-ka https://personalizedlearning.spps.org/.

Saxiixida hoose, waxaan ku ogolaaday in Iskuulada Dadwaynaha ee Saint Paul in ay iPad siiyaan ilmahayga magiciisa kor lagu sheegay, iyo in aan ardaygayga u sameeyo koonto (account) is uu uga faa iidaysto Barnaaijyada lagu keedsado iPad-ka (applications-apps), adeegyada ku dhisan bara-interneed oo ku dhisan ee uu maamulku ogaalday, iyo in macluumaadkiisa shakhsigaha oo kooban uu la wadaago qoloda sadexaad ee nasiisay iPad-ka. Waxaan sidoo kale fahamsanahay in laga yaabo in la I ganaaxo hadii aan lumiyo ama waxyeeleeyo qalabka kor ku xusan.

Saxiixa waalidka ama daryeelah: ______________________________ Taariikhda: ____________

SAMPLE

# KHEYRAADKA KALE

## SIYAASADAHA DEGMADA EE KU SAABSAN TECHNOLOGY

Dugsiyada Dadwaynaha ee Saint Paul waxay bixiyaan helitaanka khayraadka degmada ee technology ah loona isticmaalayo ujeeddooyin waxbarasho . Helitaan kaasii waxaa laga yaabaa in dib loo ceshado waqti kasta oo dhaqanka xad gudub ama aan habboonayn uu yimaado kasoo la xiriira isticmaalka khayraadka technology degmada.

Haddii la raaci waayo siyaasadaha ama tilmaamaha Degmada ee dukumentigan ku qoran si loo daryeelko iyo si loo isticmaalo iPadka, taasi waxay keeni kartaa in la waayo mudnaanta gaarka ee la idinku siiyey iPadka. Isticmaal walba dhamaan waa in la waafajiyaa siyaasadaha "policies" soo socda:

- Siyaasadda 501 Mamnuucidda Dhibaatooyinka "Hazing"
- Siyaasadda 505 Mamnuucidda Xoogsheegadka
- Siyaadadda 520 Isticmaalka iyo Dhaqaalaynta
- Tilmaamaha Isticmaalka Habboon ee Technology oo Ardayda
- Siyaasadda 506 Anshaxa Ardayga
- Xuquuqda iyo waajibaadka Handbooka

Dhamaan siyaasadaha "policies" waa in halgaan laga aqriyo lagana dul-maro http://boe.spps.org/SECTION_V_STUDENTS2

IPadka waa hanti ah ay leedahay Dugsiyada Dadwaynaha ee Saint Paul sidaa darteed waxaa la awoodaa in hubin iyo dib u eegin lagu samen karo waqti kasta.

## ILAHAHA LAGA TALO QAATO

Intii lagu jiro abuurista buugan, Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul waxay la tashatay websites, Tilmaame-barayaal, iyo shaqaalaha ka yimaadeen degmooyinka ka socda:

Becker Public Schools
Farmington Area Public Schools
Hopkins Schools
Minneapolis Public Schools
Minnetonka Public Schools
South Washington County Schools
Spring Lake Park Schools

Saint Paul
Public Schools
A World of Opportunities

360 Colborne Street, Saint Paul, Minnesota 55102 | personalizedlearning.spps.org